KAALMADA SOCDAALKA

Kaalmada socdaalka waxa weeye hab gaadiidka dadweynaha oo lagu kaabaayo gaadiidka dadweynaha.
Magaalada Borås waxaanu leenahay hab lagu wada raaco kaalmada socdaalka qaranka. Taas micnaheedu waxa weeye inaad dadka kale ee ugu dhawaan isla dariiq aad u socoto tagaaya aad raacdo iyadoo aanad markasta ku safrayn dariiqa kuugu dhow ee safarkaaga.

OGOLAANSHAHA KAALMADA SOCDAALKA QARANKA

Ogolaanshahaaga kaalmada socdaalka qaranka waxa ku dhigan inta ay soconayso iyo inaad xaq u ledahay wehel safarka. Waa masuuliyada macaamiisha inuu dalbado haddii loo baahdo kordhin ogolaanshaha ah.
Markasta oo aad safrayso qaado ogolaanshaha kaalmada socdaalka qaranka, waa inaad taas iyo aqoonsi sawir leh oo shaqeynaysa tusi karto dirawalka. Baahida gaarka ee inaad kaligaa raacdo, booska kursiga hore iyo wehelka ayaa maareeyahaaga kaalmada socdaalka qaranku si gaara u eegayaa.

Ogolaanshaha kaalmada socdaalka qarankaayaa dib loo eegi karaa haddii aad hesho fursad ka fiican oo aad ku raacayso gaadiidka dadweynaha. Waa inaad wargaliso maareeyaha kaalmada socdaalka dhamaan wixii isbadel ah ee xaaladaada saameyn ku leh.
Ogolanshaha kaalmada socdaalka ayaa lagaa qaadi karaa haddii aad gashay qalad weyn ama mid aad dhowr jeer aad ku soo celcisey oo shuruudaha iyo xeerarka ka shaqeynaaya kaalmada socdaalka.
Haddii aad saameyso badbaadada gaadiidka ama bay'ada shaqada ee dirawelka xiliga safarka, ayuu qandaraaslahu xaq u leeyahay inuu ku diido inuu kuqaado.

IN LAGU SAFRO KAALMADA SOCDAALKA

Isku duba ridka

Waxaad safreysaa inaat jeer ee aad rabto sida gaadiidka loo heli karo. Waxad safri kartaa inta u dhaxaysa 05.30-24.00. Habeenka Sabtida iyo Axada ilaa saacada 02.45.
Si aad ugu hesho isku dubarida ugu weyn ee safarka waa inaad joogto banaanka guriga iyadoo aad diyaar u tahay inaad safarto xiliga la isla qaatey. Maareynta farsamada ayaa xaq u leh inay dib u dhigaan safarkaaga ilaa 10 daqiiqo ee laga bilaabo xliga la isla qaatey, iyagoon kusoo wargalin.

Meeshaad u safrayso

Waxaad u safri kartaa kamuunka dhexdiisa iyo ilaa 10 kilo mitir oo kamuunada xadka la leh.
Haddii safarkaagu uu yahay meel ka baxsan 10 kilo mitir xadka ayaad dalban kartaa kaalmada socdaalka ee la kordhiyey. Waxaad markaa bixinaysaa qiimaha saacda mitirisa masaafadaa.
Ma badali kartid meeshaad u safrayso xiliga safarka gudihiisa.
Gaadiidku ma istaagaayo xiliga safarka isagoon cidna sugeyn inaad arin qabsaneyso. Waxa taas ka reeban booqasho gaaban oo xabaalaha lagu tagaayo, lacag mishiinka lagla soo baxaayo, soo qaadida iyo geynta carruurta xadaanda iyo dugsiga. Mararkaa waxa lagaa qaadayaa kharash iyadoo ay tahay inaad sheegto markaad xejisaneysof.

Shandadaha
Waxaad sidan kartaa shandada u shigma waxa caadi ahaan la sito baska, taas waxa loola jeedaa shandad gacan kasta ama shandada safarka. Dirawalku waxa uu kaa caawinayaa shandadaha saaristooda iyo dajintooda ilaa uu albaabka kuu geeyo.

Dadka kula safraaya
Xiliga adega safarka ayaa fursad u ledahay inaad kaxaysato qof ama dhowr qof oo kula safra. Dadka kula safraaya waxay bixinayaan qiime la mid ah ka uu qofka xaqa u leh adeega safrku bixinaayo iyagoo ku raaci kara haddii uu boos jiro.
Markasta sheeg xiliga aad qabsaneyso safarkaaga haddii ay kula socdaan cid kula safreysaa. Dadka kula safraaya ma aha inay sababaan masaafad ka dheer waxa looga baahan yahay safarka kaalmada socdaalka.

Wehelka
Haddii curyaanimadaadu ay keenayso baahida aad caawimo ugu bahantey safarka gaadhiga dhexdiisa, taas oo ka baxsan waxa uu dirawalku kaa caawin karro, ayaaad dalban kartaa wehelka. Xuquuqda wehelka waxa loo eegayaa si gaar ah iyadoo dalabka aad ka sameynayso maareeyahaaga kaalmada socdaalka.
Qofka wehelka ahi waxa uu ku siin karaa caawimada macaamiishu u baahantey. Qofka isagu ah mid loo ogolyey kaalmada socdaalka ayaan noqon karin wehel.
Wehelka laguma siinaayo maxaa yeelay waxaad safarka u baahan tahey caawimo ama waxaad u baahan tahay cid kula qaada alaab aad soo iibsatey.

Xawayaanka guriga
Waxaad qaadan kartaa xawayaanka guriga, kaas oo markaa lagu ridaayo meesha bagaashka. Waxa lagaa waadayaa kharashka u dhigma ka qofka kula safraaya. Ayga dadka indhoolka haga lagaama waadaayo wax kharash ah. Markasta oo aad dalbanayso safarka sheeg haddii aad wadato xawayaanka guriga.

Carruurta
Haddii ay kula safrayaan carruur ka yar 4 sanno, ayay tahay adiga masuuliyadaada inaad u soo qaado kurisiga carruurta ee ku haboon.

Safarka kursiga curyaamiinta ee baska kaalmada socdaalka
Qofka ku jira kursiga curyaamiinta ee ku safraaya baska kaalmada socdaalka ayaa laga soo qaadayaa oo la qeynayaa markasta guriga gudihiisa.
Macaamiisha ayaa ka masuul ah inuu kursiga badbaadsanaado. Dirawalku waxa uu kaliya ka masuul yahay inuu kursiga si sugan ugu xidho baska.

Haddii aad fuulayso ama ka soo degayso jaranjar waa inay jarjartu qaadi kartaa qof jarjarta fuuli kara. Waa dadka jaranjarta fuulaaya cida qiimeynayso inay taasi hab sugan u dhici karto.
Waxa kale oo ay u baahantey in kursigaagu awoodi karo inuu fuulo jaranjarta

Diraweka adeega safarku kaama caawinaayo guryaha jaranjarada leh.

Kharashka
Waxaad bixinaysaa kharash u dhigma safar hal mar oo gaadiidka dadweynaha ah. Kala qeybqeybinta goobahu (Zonindelningen) waxay la mid tahay ta gaadiidka dadweynaha.

Kharashka waxa toos loo siinayaa dirawelka ka hor intaanu safarku bilaabmin. Waxaad ku bixin kartaa kaash ama kaadh. Ma aha inaad wax dheeraad ah (cabitaan/bakhsiish) siiso.
Wixii ka danbeeya 24.00 waxa shaqeynaaya qiimaha habeenka.

Kaadhka bisha
Kaadhka bisha ayaa intaad doonto ku raaci kartaa kamuunka dhexdiisa, sida u dhiganta gaadiidka dadweynaha.
Kaadhka bishu waxa uu shaqeynayaa hal bil marka laga bilaabo taariikhda aad rabto. Waxaad ka iibsan kartaa kaadhka bisha oo hal bil ama ama wakhtiyo badan oo isku xidhan.
Waxaad bilaabeysaa kaadhka bisha adigoo u sheegaaya xarunta xejiska kaalmada socdaalka, tel 033-35 50 50.
Wakhti shaqadiisu bilaabmatey lama soo celinaayo.
Waxaanu kadib soo diraynaa risiidhka aad wax ku iibsatey.

Xejiska safarka
Waxaad safarkaaga xejisan kartaa ilaa 14 maalmood safarka ka hor. Cida kaa qaadeysa xejiskaaga ayaa rabta macluumaadkan:

- Magacaaga iyo/ama lambarkaaga shakhsiga
- Lambaka telefoonkaaga

- Xiliga aad baxayso-iyo/ama xiliga aad imaneyso
- Cinwaanka lagaa soo qaadaayo-iyo ka lagu geynaayo
- Inta qof ee safraysa iyo haddii ama laguu ogol yahay kaalmada socdaalka
- Aalada caawimo ee aad wadato

Isla markaa xejiso haddii ay suurto galtahay soo noqoshadaada.
Haddii aad leedahay wakhtiyo soo laalabanaaya o aad doonayso inaad safarto - tusaale ahaan shaqo ama koorso - ayaad xejisan kartaa safaro go'an.

Baajinta
Ka foojignow inaad baajiyo haddii aanad safreyn.
Maarenta farsamada ayaa xaq u leh inay kharash ka qaadaan u dhigma 10 jeer laab ka shakhsiga haddii aanad baajin. Laakiin kharashka lagaama qaadaayo marmarka dhifta hadey dhacdo.

Safarka kamuun kale
Haddii aad si kumeelgaadh ah u joogto kamuun kale ayaad raaci kaalmada socdaalka ee kamuunkaa iyo ka kamuunka xadka la leh. Safaradaa waxa laga xejisanayaa telefoonka Sverigetaxi Borås AB. 033-722 84 07. Kharashku waxa uu la mid yahay ta tagsiga kamuunka magaalada Borås. Kharashka waxa toos loo siinayaa dirawelka.

Gaadiidka kale ee dadweynaha
Marka laguu ogolaadey kaalmada socdaalka ayaad lacag la'aan ku raacaysaa gaadiidka dadweynaha ee magaalada Borås. Si aad taas u sameyso waa inaad aado Tidpunkten ku yaala Södra torget iyadoo aad tuseyso ogolaanshahaaga kaalmada socdaalka iyo aqoonsi sawir leh oo shaqeynaaya. Waxa markaa aad helaysaa kaadhka bisha oo aad lacag la'aan ugu raaci karto gaadiidka dadweynaha ilaa inta ogolaanshaha adeega safarku uu shaqeynaayo.

Macluumaadka sida uu gaadidka dadweynuhu u shaqeeyo ayaad ka helaysaa Västtrafik.

MACLUUMAADKAYAGA AANU ADIGA KAA HAYNO

Dhamaan safarka kaalmada socdaalka waxa lagu qorsheynayaa kombiyuuterka. Xarunta xejiska waxa laga arki karaa:

- Inaad haysato kaalmada socdaalka
- Nooca gaadiidka aad raaci karto
- Haddii aad fuuli karto kursiga danbe
- Haddii aad xaq u leedahay wehel
- Haddii aad wadato aaladaha kaalmada oo waaweyn, sida tusaale qalabka socodka ama kursiga curyaanka.

Macluumaadka ayaa ay maareeyaha adeega gaadiidku galin karaa kombiyuuterka.
U sheeg maareyahaaga haddii aad badashey magacaaga, cinwaankaaga, lambarkaaga telefoonka ama haddii ay dhacdey isbadel ku salaysan curyaanimadaada.

Dirawelku waxa uu gaadhiga ku helayaa amar waditaan oo magacaaga iyo meesha lagaa soo qaadaayo iyo meesha lagu geynaayo.
Haddii aad doonayso inaad ogaato waxa meesha kombiyuuterkayaga kuugu qoran ayaad soo wici kartaa maareynta farsamada.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Macluumaad dheeraad ah oo ku sabsan kaalmada socdaalka ayaad kaga heli kartaa telefoonka Maareynta Farsmada ee 033- 35 74 00, kuwaas oo ka jawaabaaya su'aalah ku sabsan:
OGOLAANSHAHA KAALMADA SOCDAALKA QARANKA
Shuruucda safarka
Safarka kamuun kale
Khatarta ageeda gaadiidka

Wixii macluumaad hadda jira, shuruucda iyo xeerarka ayaad markasta ka helaysaa boras.se/tekniska